WASAARADDA WAXBARASHADA HIDDAHA
IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD. 2020

# SAYNIS

2020

XAFIISKA IMTIXAANKA IYO SHAHAADADA

SomExams

## Maadada seyniska

**Ka jawaab su'aalaha soo socda adiga oo goobo gelinaya jawaabta saxada ah. (100 DHIBCOOD)**

3. Maxay geeduhu u baahan yihiin si ay u samaystaan cunto?
   Biyo, macdan iyo ogsijiin
   t) Biyo, kaarboon, iyo ilayska qorraxda
   J) Biyo, kaarboon laba ogsaaydh, ileyska qorraxda iyo cagaariye
   Biyo iyo kaarboon laba ogsaaydh.

13. Duumadu unugyadee ayey wax yeeshaa?
   b) Unugyada beerka
   t) Unugyada wadnaha
   j) Unugyada caloosha
   x) Unugyada xiidmaha

3) Biyaha ugu badan ee dunida waxaa loo isticmaalaa:
   b) Waraabka beeraha  t) Nadaafadeed  j) Cunto karsasho  x) Dhaqasho xooleed

4) Midoobidda xawada labka iyo ugxaanta dheddigga waxaa loo yaqaanaa:
   b) Abuuris  t) Bacrimin  j) Huurin  x) Foolin

5) Duumada waxaa gudbiya dhilmaayada/kaneecada nooceeda dhedigga ah ee loo yaqaan:
   b) Blaasmoodiyam  t) Tarebanema  j) Malaariyo  x) Anoofalis

6) Isku soo aruuridda ilmo galeenka marka ay bilo dhameysato naasleydu waxaa loo yaqaan:
   b) Sidka  t) Foosha  j) Dhalmada  x) Nuujinta

7. Halbeegga lagu cabbiro hawsha waxaa loo yaqaan:
   b) Niyuutan  t) Mitir  j) Juul  x) Sentimitir

8. Boqolleyda biyaha macaanka ah ee laga helo dunidda waa:
   b) 100%  t) 30%  j) 1%  x) 70%

9. Cudurka waraabowga waxa uu ku bilawdaa:
   b) Qandho
   t) gariir
   j) Boog yar oo agagaarka xubnaha taranka kasoo baxda
   x) daal iyo xubno xanuun

10. Muddada uur-ku-sidka lo'da waa
   b) Sagaal bilood  t) Sideed bilood  j) Shan bilood  x) Lix bilood

11. Kaamirada biindaloolka waxa ay sameysaa humaag:
   b) Toos ah  t) Janjeera  j) Qotoma  x) Foorara



Xaji printing :0619444116

☞ www.somexams.com  info@somexams.com  © In cooperation with www.qalinqaad.com

12. Uur-jiifka iyo hooyada waxaa isku xira:
    b) Mandheerta t) Tuubada ugxanta j) Caloosha x) Xiidmaha yar

13. Bakteeriyada keenta cudurka jabtada waa:
    b) Taraboneema balaadiyam t) Neyseeriya ganoriya
    j) Balaasmoodiyam x) HIV fayras

14. Isbedel tartiib ah ee hoore loogu bedelayo neef waxaa loo yaqaanaa:
    b) Uumi bax t) Siimow j) Biyo lun x) Carro luumi

15. Xubintee ayaan kamid aheyn xubnaha taranka ee dheddiga naasleyda?
    b) Ugxaan-side t) Marin ugxan j) Marinka xawda x) Marinka dhalmada

16. Halkee ayey jabtadu kaga dhacdaa dumarka?
    32. Ilmo galeenka korkiisa
    34. Kaadi heysta
    29. Ilmo-galeeenka iyo marinka kaadida
    43. Keliyaha

17. Isbeddel-maalmeedka xaaladaha jawiga meel iyo muddo gaar ah waxaa loo yaqaanaa:
    b) Cimilo-gooreed t) Cimilo j) Gibil x) Atmosfeer

46. Maxaa sababa in dadka qaar aysan arki karin waxyaabaha u dhow (aragga fog)? b) Hummaagga oo ku dul sameysma ratiinaha gadaashiisa
    t) Hummaagga oo ka sameysma ratiinaha hortiisa
    x) Hummaagga oo ka sameysma ratiinaha.

19. Cudurradaan soo socda, midkee ku gudba biyaha iyo cuntada wasakheysan?
    b) HIV t) Tiifowga j) Duumada x) Isfiilatada

20. Xubintee ayaan kamid aheyn xubnaha taranka ee labka naasleyda?
    b) Xiniinyaha t) Tuubada xawda j) Marin ugxan x) Xubin galmo

21. Sheeg labada cirif ee ay leedahay birlabta?
    b) Cirif koofureed iyo waqooyi t) Cirif waqooyi iyo cirif bari
    j) Cirif bari iyo cirif galbeed x) Cirif koonfureed iyo cirif galbeed

22. Qaabkee ayaa looga hortagi karaa cudurka duumada?
    b) In la xirto maro kaneeco t) In la qaato barasitamool
    j) In la cabo biyo badan x) In la cunno kalluun

23. Cilladda arag dheerida waxaa la saxaa iyada oo la isticmaalayo:
    b) Bikaaco firdhiye ah t) Bikaaco kulmis iyo firdhiye ah
    j) Bikaaco kasta x) Bikaaco kulmis ah



**Xaji printing :0619444116**

☞ www.somexams.com ✉ info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

24. Immisa toddobaad ayuu qaataa heerka labaad ee cudurka waraabowga?
    b) 3 ilaa 8 todobaad t) 2 ilaa 12 todobaad
    j) 3 ilaa 5 todobaad x) 4 ilaa 8 todobaad

25. Koriinshiyaha buuxa ee uur-jiifka aadanaha waxaa la yiraahdaa:
    b) Foosha t) Dhalmada j) Nuujinta x) Uur-kusidka

26 Sidee lagu xakameyn karaa cudurka aydhiska?
    b) In laga fogaado wada sheekeysiga t) In laga fogaado salaanta gacanta
    j) In laga fogaado cunto isla cunidda x) In laga fogaado sinada

27. Qalabka lagu cabbiro roobka waxaa loo yaqaanaa:
    b) Xawaare-beeg t) Cadaadis beeg j) Roob-beeg x) Roob-kulmiye

28. Hababka soo socda midkee ayaan lagu daryeeli karin deegaanka?
    b) Xaalufinta dhirta t) Illaalinta dhirta
    j) Beeridda dhir cusub x) Bacriminta dhirta

29. Boqolleyda biyaha milixda ah ee laga helo dunida waa:
    b) 90% t) 30% j) 1% x) 70%

30. Waa maxay sababta beeraleyda loogula taliyo in ay habeenkii waraabiyaan beeraha?
    b) Si ay u bataan socodka biyaha t) Si loo xakameeyo qulqulka biyaha
    j) Si beertu biyo badan u cabto x) Si loo yareeyo uumi baxa biyaha

31. Muddada ay shimbirtu ku fadhido ukunta waxaa loo yaqaanaa:
    b) Bacrimin t) Ukun-dillaacin j) Ukun illaalin x) Ukun dhalis

32. Waraabinta yareysa uumi baxa biyaha, toosna u gaarsiisa xididka geedka waxaa loo yaqaanaa:
    b) Waraabin buufis t) Waraabin caadi j) Waraabin dhibcis x) Waraabin rasmi

33. Xaniinyaha labku waxa ay soo saaraan:
    b) Xawo t) Ugxaan j) Kaadi x) Hoorar

35. Bacriminta bin'aadamka waxa ay ka dhacdaa:
    b) Gudaha dheddigga t) Guddaha labka
    j) Gudaha labka iyo dheddigga x) Dibadda labka iyo dhediga

36. Maaddada caleenta geedka u yeesha midabka waxaa loo yaqaanaa:
    b) Kaarboon t) Footosintasis j) Oksajiin x) Cagaariso

37. Midkee ayaan ka mid aheyn wasakhda dabiiciga ah ee keena diikhowga carrada?
    b) Foolkaanada t) Dhul gariirka j) Fatahaadaha x) Sunta haraaga warshadaha





www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

38. Halkee ayuu ku yaallaa ilmo galeenka bini'aadamku?
    b) Bartamaha godka sinaha
    t) Bartamaha caloosha
    j) Bartamaha xabadka
    x) Bartamaha labada sambab

39. Sheeg xubinta geedka u samaysa cuntada?
    b) Jirridda t) Miraha j) Caleemaha x) Xididdada

41. Qalabka lagu cabbiro qoyaanka hawada waxaa loo yaqaanaa:
    b) Xawaare-beeg t) Cadaadis beeg j) huurbeeg x) cadaadis beeg

42. Silsiladda cuntada iyo shabakadda cuntada waa isku mid marka laga eego hannaanka:
    b) Biyo qaadashada t) Tamar socodka j) Nooca cuntada x) kala fogaanshaha

43. Rahu waxa uu dhalaa:
    b) Ukun t) Dhallaan yar j) Lullume x) Buuba

44. Keymuhu xaddi intee la'eg ayey uga fadhiyaan dhulka?
    b) Saddex meelood hal meel
    t) Saddex meelood labo meel
    j) Afar meeleed saddex meel
    x) Afar meelood labo meel

45. Lullumadu waxa ay ku neefsataa:
    b) Dulleelo t) Afka j) Sanka x) Waafyaha

46 Dul janjeer leh kana sameysan alwaax ama bir fidsan ayaa waxaa loo yaqaanaa:
    b) Kabaalka t) Khafiyad j) Kariirad x) Sallax janjeera

47. Ileyska soo gala isha waxaa bar ku taalla retinaha ku uruuriya:
    b) Xuubka t) Bikaacada j) Bu'da x) Wiilka

48. Gacan ama ul toosan oo ku dul wareegta bar ama taako sida saacad, waxaa loo yaqaanaa:
    b) Kabaal t) Khafiyad j) Kariirad x) Salax janjeera

49. Xiddigga mar kasta jooga xagga waqooyi waa:
    b) Libaaxa t) Nin la gigay j) Xidig cirif x) Isku tallaabta

50. Unugyada dareema xaddiga ileyska waa:
    b) Bikaacada isha iyo Xuubka isha
    t) Bu'da isha iyo wiilka isha
    j) Rodis iyo konis
    x) Xuubka isha iyo retinaha isha



Xaji printing :0619444116

☞ www.somexams.com ֍ info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com